



# Maxaad ka baratay?



## Tabta baro

- U sheeg mowduuca:** Ilmahaaga ku martiqaad inuu kuu sheego waxa buuggu ku saabsan yahay ee guud ahaan.
- U sheeg xaqiyooyinka ugu muhiimsan:** Kan waa ka duwan yahay waxa xiisaha lahaa oo kaliya. Waa fikradda ama fikradaha ugu muhiimsan. Ka fakar waxa uu qoraagu isku dayay in uu naga baro mawduuca sheekada. Dhowr waxyaabood ayay noqon kartaa. Ilmahaaga ku marti qaad inuu tilmaamo kalmado iyo weero buugga ku qoran si ay u taageeraan fikradooda.
- U sheeg xaqiyo maaweelo leh ama xiiso leh:** Hadda ka hadal waxyaalaha ugu xiisaha badan, ugu yaabka badan, ugu weyn, ugu waalan, ama la ma filaanka ah ee aad labadiinuba barateen! Soo hel erayada ama sawirrada qeexaya xaqiiqadan.

### Waa maxay sababta tabtan?

Buuggaagta aan khayaali ahayn, waxaan is weydiin karnaa "maxaan ka bartay?" Sidan markay tahay, maskax ahaan ayaanu u habaynaynaa maclumaadka, oo waxaa intaa ka sii muhiimsan, xusuusnow!.



## Ubadkaaga weydii

*Carruurta da'da yar:*

- Muxuu buuggan sidiisaba ku saabsan yahay? Maxay ku saabsanayd inta badan?
- Muxuu ahaa waxa adiga kaa yaabiyay? Buugga iga dhix tus waxa aad ka baratay.
- Muxuu ahaa waxa aad horeyba u ogeyd?

*Carruurta weyn:*

- Waa maxay wax weli aad la yaaban tahay hadda oo aad buuggan dhammaysay?
- Waa maxay waxa qoraagu uu isku dayaayo inuu wax naga baro mawduucan? I tus sida aad ku ogaatay.
- Haddii aad saaxiib u sheegi lahayd buuggan, maxay yihii waxyaalaha ugu waaweyn ee aad la wadaagi lahayd?



## Ku celcelis ciyaar leh

Ilmahaaga kala hadal wax ay jecel yihii inay wax badan ka bartaan. Samee liisti ku qoran waxa ay hore uga ogaayeen mawduuca iyo waxay jecel yihii inay bartaan.

Kadib qatka gal oo mawduucaas baar. Caalamadee liistiga ay rabaan inay wax ka bartaan intiiba aad xogta wax ka ogaanayso. Su'aalo cusub ku qor.

Waa kan kuwa dhawr ah oo aad ku bilaabi karto:

- [www.kids.nationalgeographic.com](http://www.kids.nationalgeographic.com)
- [www.dkfindout.com](http://www.dkfindout.com)
- [www.weatherwizkids.com](http://www.weatherwizkids.com)
- [www.pbslearningmedia.org](http://www.pbslearningmedia.org)